Erayga iyo Maanta Somtwt 0261
Kalsoonida

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Kalsoonida.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Kalsoonida** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: QALBIGAYGAA KU DOORTAY.

Ciise wuxuu ahaa nin tukada, waxaase la yaab leh sida ay u yar yihiin salaadihiisa ku qoran kitaabka. Qaar ka mid ah jawaabaha arrinkaas ayaa waxay tahay in salaaddu ahayd wax laga doonayey wadaaddada reer Binu Israa'iil. Maaddaama Ciise ahaa hoggaamiye ruuxi ah, waxay ahayd inuu mar waliba salaad oogo.

Wadaadada Israa'iil waxaa jira duco ay ku ducaysan jireen maalin waliba, waxayna ahaayeen ducooyin is xigxiga oo si kal iyo laab ah ay u oogi jireen. Markaa ma ahaan jirin wax lala yaabo in la arko Ciise oo ducaysanaya. Xaqiiqdii, qorniinka wuxuu ka hadlay in Ciise uu aalaaba kelidii aadi jiray meel cidla ah si uu Ilaah u soo baryo.

Sababahas daraadood, maahan wax lala yaabo inaan la qorin salaado badan oo Ciise laga qoray. Dadka caadi bay u ahayd inay arkaan Ciise oo tukanaya oo Ilaah baryaya had iyo goorba. Arrinta xiisaha leh ayaa waxay tahay in badanaa salaadaha laga

qoray Ciise inay gaagaaban yihiin. Waa kuwo gaaban oo ka kooban hal iyo labo sadar ama laba jumlo. Iyaga oo dhan ma ahayn ducooyin la qurxiyey ama ammaan sare leh. Waa jumlo fudud oo baryo ah. Ciise, samada intuu fiiriyo ayuu la hadli jiray aabbihiisa, wuxuuna dhihi jiray waxa maankiisa ku jira markaas, oo hawshiisa kale ayuu wadan jiray.

Haddaba, waxaannu wax ka baran karnaa sidii Ciise Ilaah u baryi jiray. Waxaa jirta maalin aan khudbado taxane ah aan diyaariyey kuwaasoo aan ugu magacdaray **"Salaadihii Ciise"** waxaan wakhti kaddib idinkana idinla wadaagi doonaa waxyaabihii aan ka barannay salaadaha Ciise. Mid ka mid ah salaadahaas Ciise waxay ku qoran tahay Inujiilka sida Matayos u qoray cutubka 11aad. Waa duco gaaban, waxaana uu salaaddaas oogay mar uu dhexda uga jiray wada xaajood socday, waxaana Ciise uu yiri sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 11:25-26, waxaana qoran sidatan:

"Wakhtigaas Ciise ayaa hadalkan yidhi, Aabbow, Rabbiga samada iyo dhulkow, waan kugu mahadnaqayaa, waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo waxaad u muujisay ilma yaryar. Haah, Aabbow, waayo, sidaas ayaa kaa farxisay."

Bil-xaqiiqa markaad eegto waa salaad aad u gaaban. Muxuu soo xiganayaa halkan marka Ciise uul eeyahay, **"Waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo waxaad u muujisay ilma yar?"** Waa hagaag, wuxuu dhammeeyey markaas khudbad uu uga hadlayey doorka Ilaah, iyo carada Ilaah ee ku soo fool leh magaalooyinka uu booqday ee uu hadalka ku wacdiyey. Wuxuu tegay magaalooyin ku yaala xeebaha woqooyi ee Badda Galalii, wuxuuna ku wacdiyey wax ku saabsan akhbaarka boqorka,

wuxuuna dadka ugu yeeray inay akhbaarkaas rumaystaan, laakiin kuwo badan ayaa diiday. Badankood dadkii way ku majaajiloodeen, oo ku kajameen, iyagoo wixii uu kala hadlayeyna aan dhug iyo fiiro u yeelan ayey isaga tageen. Markaasaa Ciise magaalooyinkaas belaayada ku soo socota ka hadlay.

Wuxuu yiri, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 11:23, oo leh:

"Adiguna Kafarna'umay, samada ma laguu sarraysiin doonaa? Waxaad ku degi doontaa Haadees, waayo, haddii shuqulladii xoogga lahaa oo lagugu dhex sameeyey, Sodom lagu samayn lahaa, ilaa maanta way joogi lahayd."

Runtu waxay tahay inaan qaabilno Ciise Masiix. Haddii aadan qaabilin Ciise Masiix, waxaad ku hoos jirtaa habaarka Ilaah taasina ma khusayso ama loo tixraaci maayo hiddaha iyo dhaqankaaga, ama diinta aad haysato. Ciise waa Masiixa dunida. Waana kan loo bixiyey inaad ka badbaaddo carada Ilaah ee dembiga.

Markii farriinta ah in Ciise yahay Sayid ay kuu timaaddo oo lagaaga baahdo inaad ka cibaadaysato oo jeclaato, waa inaad aqbasho taas waxaana jira ciqaab iyo caro Ilaah uga imanaysa kuwa yasa ama liida Masiixa. Farriintan maanta kuu timid maahan ciqaabta iyo carada Ilaah, laakiin waa xaqaa'iq ku salaysan in Ilaah u muujiyey boqortooyadiisa dad aan magac iyo maamuus ku lahayn bulshada oo iska caadi ah.

Lagaagama baahna shahaadooyin sare si aad ku qaabisho Ciise Masiix. Lagaana dooni maayo inaad tahay nin garaadkiisu sarreeyo ama aqoonyahan ah. Welibana qof iska caadi ah ayaa fahmi kara in Ilaah jecel yahay dunida iyo inuu na siiyey Bixiyaha. Waana sababta Injiilku inoo cajab geliyo.

Waxaana suuragal ah in taasu ay sabab u tahay wixii Ciise ugu tukaday salaaddiisii fududayd. Ilaah xaaladaha inaguma adkeeyo, iskuna dayi maayo inuu qaabeeyo hannaanka diinta si adiga wax laguu baro sanado badan si fahamkaaga kor loogu qaado. Maya, laakiin waa bilcagsiga umuurtaas. Xaqiiqdii, kooxaha masiixyiinta ah ee dunida waxay ilmaha yaryarka ah baraan masaaladii Ciise Masiix.

Waxaana u sheegeen isla qisooyinkii Ciise iyaga u sheegay si uu ku baro run ruux ahaaneed oo ku saabsan boqortooyada Ilaah. Masiixinnimada maahan wax dhib badan; mana ahan wax maskax daalis ah si kuwa garaadkoodu sarreeyo oo keliya ay u fahmaan. Maya, Ilaah baa jilciyey, oo haddana ka dhigay wax cajiib ah. Runta iyo casharrada Ciise laynoo soo marsiiyey waa kuwo baaxaddoodu weyn tahay oo markii aad noloshaada geliso ku siinaya farxad weyn iyo xigmad iyo waxgarasho.

Ciise sidan fudud ayuu u tukaday wuxuuna ugu yeeray Aabihiis Ilaaha samada iyo dhulka. Waxaa jira haddaba arrin ay tahay inaan fahanno. Markii aynu Ilaah hor joogno oo ducaysanayno waxaannu ugu yeeri karnaa Aabbe. Waa sharaf iyo haybad layna siiyey inaan Ilaah ugu yeerno Aabaheen! Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka ugu horreeya ayaa looga hadlayaa sida aynu ku noqonay carruurtii Ilaah.

Faham darrada ka jirta diimaha dunida waxaa weeye in innaga oo dhan aynu nahay caruurtii Ilaah, iyadoo aan la eegaynin diinta aad haysato, ama sida aad ugu camal falayso iyo cibaadaysigaaga gaarka ah xagga Ruuxa. Diimaha oo dhan ayaa laysku keenay waxaana la leeyahay innaga oo dhan waxaynu nahay aadami ah caruurtii Ilaah.

Waa fikir calmaani ah. Masiixiyiinta fikirkaas waa ka soo horjeedaan, laakiin masiixinnimadu way fududdahay. Waxaad noqon kartaa carruurtii Ilaah ama muumin Ilaah markaad aqbsho wiilka Ilaah. Ku noqon maysid muumin Ilaah markaad ku dhaqanto diin iyo xeer, aidigoo salaado ku soo noqnoqonaya, taasina kaa dhigi mayso carruurtii Ilaah. Way ku caddahay Axdiga Cusub inaad carruurtii Ilaah ku noqon karto markaad aqbsho Ciise Masiix inuu yahay Sayidkaaga iyo Badbaadiyahaaga.

Warqaddii kowaad ee rasuul Yooxanaa ayaa waxay ka hadlaysaa xaalkan, oo haddii aad haysato kitaabka waxay leedahay warqaddan kowaad ee rasuul Yooxanaa ku noqon mayso muumin Ilaah ficilad dadka, maxaa wacay waxaa dunida ku timid adigoo leh abtir, kumana abtirsatid Ilaah. Waxaad ku noqonaysaa muumin ama dhallaan Ilaah markii aad aqbasho kii Ilaah soo diray.

Inaad mar kale dhalato waxay ka macne tahay inaad Masiixa rumaysato markaasaad ka mid noqonaysaa ama ka dhalanaysaa qoyska Ilaah, waana markaad rumaysato Ciise. Waana sababta ay masiixiyiintu Ilaah ugu yeeraan Aabbe. Haddii Ciise uusan ahayn Badbaadiyahaaga, waxaan kugu dhiirogelinayaa inaad u timaaddo oo ka toobad keento dembigaaga, waayo noqon maysid muumin Ilaah ilaa aad u timaaddo Ciise Masiix oo aqbasho mooyaane.

Tanina waxay ku keenaysaa inaad qayb ka noqoto qoyska Ilaah. Boqortooyada Ciise keenay, bannaanka ayaad ka joogaysaa haddii aadan rumaysan Ciise. Waxaan kuu sheegayaa umuurahaas oo ah fikirkayga shakhsi ahaaneed, waana waxa kitaabka Axdiga Cusub ina barayo, oo hadallada Ilaah baa lagu caddeeyey arrinkan.

Ciise rumayso, xaalkaaguna waa isbeddelayaa. Haatan waxaad qayb ka tahay qoyska Ilaah, oo waxaadna lahaanaysaa xaqa ah inaad Ilaah ugu yeerto Aabbahaa. Welise Rabbigu waa Ilaah. Waana kan maamula noloshaada, laakiin u maamula si kalgacal iyo raxmad badan. Mana ahan Ilaah doonaya inuu ku dhibo ama ku baabi'iyo. Ilaah wuxuu doonayaa inuu ku maareeyo noloshaada raxmad iyo jacayl iyo inuu ku siiyo hoggaan si laguu barakadeeyo.

Waxyaalahan oo dhan waa laga qariyey dunida, khaasatan shakhsiyaadka raadinaya inay nolosha ku guulaystaan oo magac yeeshaan. Waxyaalahan oo dhan waa laga qariyey iyaga. Haddana Ilaah arrinkaas wuxuu ku caddeeyey ama muujiyey hadalladiisa ku qoran kitaabka Baybalka. Haddii arrintani kugu cusub tahay, oo ay tahay sheey aadan horey u maqal amase aan si wacan laguugu sharxin, waxaan kugu adkaynayaa inaad sii dhegaysato barnaamijyada si aad ku hesho xigmad iyo faham ku siiya aqoonta Ilaah.

Waxaaba ka sii wanaagsan inaad raadsato kitaabka Baybalka. Mararka qaar waxaad heli kartaa kitaabka Baybalka haddaad ka fiiriso shabakadaha internetka ama saaxiib kale oo Masiixi ah ayaa ku siin kara, waxaad ka heli kartaa kiniisadaha, ama jameecooyinka masiixiyiinta ah ee dadka bara aqoonta Masiixa. Waxaan kugu dhiirro gelinayaa inaad kitaabka ka bilowdo Axdiga Cusub kitaabka Injiilka sida Mataayos u qoray, iyo kan Lukos iyo kan Yooxanaa, waxaanad fahmaysaa Ciise Masiix, oo way kuu soo dhowaynayaan kutubtaas Injiilada Ciise Masiix.

Waa sidaase, Ilaah wuxuu kuu hayaa qorshe nabaadiino oo cajiib ah. Waxaa laguugu yeerayaa sida ilmo yar si aad ku hesho hadiyadan Ilaah ka timid, oo aad kharashla'aan ku helayso.

Lagu weyddiisan maayo inaad noqoto carruur si aad Masiixa ku hesho, laakiin inaad xagga kalsoonida kala mid ahaato ilmo si aad Ilaah ugu kalsoonaato, labadaas fikirna kala duwanaansho weyn baa u dhexaysa. Xagga qalbiga ayaad iska hoosaysiinaysaa oo muujinaysaa kalsooni, laakiin looma jeedo ilmo noqo si aad Ciise Masiix u rumaysato.

War maxay farxad badan tahay in Ilaah muujiyey farriinta nabaadiinada, iyo inuu doonayo inaad Aabbe ugu yeerno. Wuxuu si kalgacal leh u doonayaa inaad isaga u soo dhowaato. Waxaan rajaynayaa inaad qaadato casumaadda, oo qaabisho Ciise Masiix, oo aad u timaado Ilaah una aragto inuu yahay Aabbahaaga doonaya inuu ku soo furto oo ku badbaadiyo si aad ku hesho Nolosha Daa'imka ah.

SONG: QALBIGAYGAA KU DOORTAY

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hormarinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060